JAMHUURIYADDA SOMALILAND | REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

# XEER SOCDAALKA
# XEER LAMBER: 72/1995

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**GOLAHA WAKIILADDA**

Xeerka Lamber: - ___72___ EE TAARIIKH 27KII NOOFAMBER 1995KA

# XEERKA SOCDAALKA

GOLAHA WAKIILADDA SOMALILAND:-

| | |
|---|---|
| MARKUU DARSAY:- | soo jeedinta Madaxweynaha iyo Golaha wasiirada |
| MARKUU KA DOODEY:- | Golaha wakiiladdu |
| MARKUU ARKAY:- | Qodobka 11aad iyo 30aad ee axdi qarameedka iyo lifaaqiisa, |

Wuxuu ansixiyay dib u habayn kadib Xeerkan:-

## QAYBTA KOWAAD (QODOBO GUUD)
## QODOBKA 1AAD
## HAWL-WADEENKA SOCDAALKA

Dhamaan hawlaha la xidhiidha imaatinka iyo joogitaanka (SOGGIORNO) ee ajaanibta soo gelaaya Somaliland waxaa awood u leh Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana Wasiirka uga ah wakiil Laanta Socdaalka Boliiska. Waxaa loo aqoonsanayaa hawlwadeenada Socdaalka kuwa ku xusan Xubinta hore mid kasta oo ka tirsan maamulka Dawladda ee baahi jirta awgeed Xeerka Wasiirka Arimaha Gudaha loogu magacaabo.

Diblomaasiyiinta iyo Qunsuladaha Somaliland ku leedahay Wadamada Shisheeyaha waxay awoodaan inay qabtaan hawlihii hawlwadeenada socdaalka ee xeerkani tilaamaamayo.

## QODOBKA 2AAD

## AWOODA HAWL-WADEENADA SOCDAALKA

Si loo guto awoodaha iyo hawlaha, qof kastoo hawlwadeen ka ah socdaalka wuxuu awoodaa: -

B. Markii baahi deg deg ahi jirto in uu warqadda xayiraada la'aanteed ku sameeyo, xayiraad sabeeyaasha, diyaaraddaha ama baabuurta ku sugan dhulka Somaliland, isagooo dhawraya Qodobka (58) ee Xeerka habka Ciqaabta.

T. In uu wareysi ka qaado ama inuu si ku meel gaadh ah uga qaado Dokomatiga socdaalka qof kasta oo raba inuu soo galo ama ka baxo dalka Somaliland ama qof loo hayo sabab muujin karta in uu galay denbi ka dhan ah Xeerkan iyo Xeer-Nidaamiyeyaasha fulinaaya, waxaa kale oo uu awoodaa in uu wareysi ka qaado qof-kasta oo ay ula muuqato inuu wax ka hayo xad- gudbukaas.

J. In uu ka dalbo qof kasta ee soo galaya ama qof doonaya in uu soo galo ama ka baxo dhulka Somaliland in uu bixiyo Caddeynta sharcigu tilaamayo iyo inuu hubiyo haddii loo baahan yahay warqada baadhista Caafimaadka ama sawirka iyo faraha.

X. Haddii baahi degdeg ahi jirto warqada qabashada la'aanteed in uu xidho qof kasta oo loo hayo sabab la xidhiidha danbiyada uu sheegayo xeerkani, taasi oo ay keentay warqadda qabashada oo aan la heleyn markiiba ama haddaan la xidhin qofkaas oo aan dib loo arkeyn.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qofka lagu soo xidhay warqadda qabashada la'aanteed waa in la horgeeyaa maxkamada awooda u leh ama maxkamadda ugu dhaw meesha laga soo qabtay, iyadoo la dhawrayo Qodobka 39 ee Xeerka hab Ciqaabta.

Kh. Inuu ka dalbo soo bandhiga caddeynta ula muuqata lagama maarmaan si ay isu waafaqaan caddeyntii uu kabixiyay odhaahda ama qoraalka iyadoo hadafku yahay si uu u helo ogolaanshaha uu sharcigani tilmaamayo.

## QODOBKA 3AAD

## WAAJIBKA SOO HORJOOGSIGA HAWLWADEENADA SOCDAALKA

Qofkasta oo soo galaya ama ka baxaya Somaliland waa in uu iska xaadiriyaa hawlwadeenada socdaalka. Hawlwadeenka socdaalkku waa in uu ka hubiyaa qofkasta Dukumentiga ama caddeymaha uu sito si uu u hubiyo waafaqsanaanta ogolaashaha soo gelitaanka dhulka Somaliland. Qofkasta oo soo gala dhulka Somaliland isagoo ka soo gudbaya xadka meel aanu joogin hawlwadeen socdaal, waxaa ku waajib ah in uu iska xaadiriyo sida ugu dhakhsaha badan hawlwadeen socdaal meesha ugu dhow ugu badnaan (7) todoba cisho ama maalmood laga soo bilaabo maalintii uu kasoo gudbay xadka.

## QAYBTA LABAAD

## SHURUUDAHA IMAATINKA IYO JOOGITAANKA DHULKA SOMALILAND

## QODOBKA 4AAD

## SHURUUDAHA KU IMAATINKA DHULKA SOMALILAND

Waxaa loo ogol yahay soo gelintaanka dhulka Somaliland Ajnebiga haysta:-

B. Baasaaboor ansax ah ama Dukument socdaal oo u dhigma ama haysta qofka uu Dukument uu ku qoran yahay magaciisu oo ansax ah oo la siiyay qof-ka leh.

T. Ogolaansho ansax ah ee soo geliinka iyo joogitaanka dhulka Somaliland sida uu qabo xeerkani.

## QODOBKA 5AAD

## OGOLAANSHO IMAATIN IYO JOOGITAAN

Ajanebigu waa soo geli karaa waana joogi karaa haddii uu haysto mid ka mid ah ogolaanshahan soo socda:-

B. Ogolaansho u imaatin Dal-xiis (tourism)

T. Ogolaansho u imaatin jid mar (Transit)

J. Ogolaansho u imaatin waxbarasho iyo Cilmi baadhis (Education)

X. Ogolaansho u imaatin Sabab gaar ah (Special)

Kh. Ogolaansho Deganaansho mudaysan (Temporary Residence)

D.Ogolaansho Deganaansho Joogto ah (Permanent Residence)

R. Ogolaansho Booqasho Ganacsi (Business)

S. Ogolaansho Booqasho shaqo



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

1. Ogolaanshahaas Xubinta hore lagu sheegay waxaa bixiya hawlwadeenka socdaalka ee awooda u leh si waafaqsan Qodobka Koowaad ee xeerkan iyadoo codsi uga yimid daneeyaha, waxaana lagu siinayaa Dukument Waafaqsan ogolaanshahaas ama aragtida (Visa) oo ogolaanshaha lagu muujinaayo Dukument-ga Socdaalka ee weydiistaha.

2. Oggolaanshahaas waxaa kale oo lagu bixin karaa qaab shaanbadeed (STAMP) oo hawlwadeenka socdaalku ku dhufto Dukument-ga korkiisa. Xaaladaas oo kale waa in shaanbaduhu koobayaan ogolaanshaha sida uu cadeeyay xeerkani.
3. Ogolaansha gaar ah (Special) waxaa bixin kara wasiirka Arrimaha Gudaha oo keliya.

## QODOBKA 6AAD

## OGOLAANSHO KU IMAATIN DALXIIS

Oggolaansho u imaatin dalxiis waxaa la siin karaa Ajanabi kasta oo doonaya in uu ku yimaado dalka Somaliland:

B. Ujeedo Dalxiis ama
T. Sabab kasta oo kale oo dabeeco mudaysan leh taasoo ay ula muuqato hawlwadeenka socdaalka inay tahay ansax bixinta ogolaanshaha imaatin. Bixinta ogolaansho u imaatin Dalxiis waxaa shardi u noqon kara Haysashada tigidh ah dib u noqosho oo ansax ah ama ugudub dal kale ama damaanad dabooli karta quudkiisa ajanbigaas mudada ogolaanshaha joogitaanka Somaliland ee uu codsaday. Ogolaanshaha Joogitaan Dalxiis haddii aanu shuruudo gaar ah la iman, xaqa soo gelitaanka iyo deganaanshaha ku meel-gaadhka ah ee dhulka Somaliland, mudada joogitaanku Kama badnaan karto Saddex Bilood laga bilaabo maalintii soo gelitaanka. Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu kordhin karaa mudada joogitaanka (2) laba jeer isagoo tixgelinaaya codsi uga yimid qofka danaynaya sii joogista dalxiisa, iyadoo kordhin kastaa u dhiganto saddex bilood, waxa kaloo uu awood u leeyahay inuu wax ka beddelo shuruudaha.

## QODOBKA 7AAD

## OGOLAANSHAHA U IMAATIN JIDMAR (TRANSIT)

Ogolaanshaha u imaatin jid-mar waxaa la siin karaa Ajnebiga: -

B. Qasdigiisu yahay in uu ku yimaado Somaliland si uu u sii wato Socdaalkiisa meel ka baxsan Dalka Somaliland.
T. Inuu haysto Dukument ansax ah ee looga baahan yahay gelitaanka wadanka uu u socdo. Bixinta ogolaanshaha u imaatin jid-mar waxaa shardi u ah haysashada tigidh ansax ah oo muujinaaya sii waditaanka socdaalka wadanka uu u jeedo ama dariiq ku haboon sii wadashada socdaalka iyo haddii la weydiiyo rahan ama damaanad dabooli karta baahidiisa ajenabigaas inta uu ku joogo Somaliland jid markaas, marka laga reebo shuruudaha gaarka ah ee ogolaansha imaatinka jidmarka, xaqa soo gelitaanka dhulka Somaliland, si loo sii wato socdaalka-ka baxsan dhulka Somaliland, ansixidda mudadu kama badnaan karto 14 (afar iyo toban) maalmood laga bilaabo maalintii soo gelitaanka, haddii aanay iman markaas awood ka baxsan qofka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QODOBKA 8AAD

## OGOLAANSHAHA KU IMAATIN SABAB WAXBARASHO (EDUCATION)

Ogolaanshaha ku imaatin sabab waxbarasho waa lasiin karaa ajaaniibta rabta inay ku soo galaan ama ku joogaan dhulka Somaliland ujeeddo ah in uu ka qayb galo koorsooyin waxbarasho iyo tababaro dugsiyo ku yaala Dhulka Somaliland, Koorsooyinkaas oo la xaqiijiyay inay ka diwaangashan yihiin dalka. Waxa kale oo loo ogol yahay ajnebi booqasho Cilmi baadhis iyo aqoon is waydaarasho. Bixinta Ogolaansho sabab waxbarasho waxaa shuruud looga dhigi karaa tigidh ansax ah oo noqosho ah iyo rahan ama damaanad dabooli karta quudkiisa ajnabigaas inta uu joogo dhulka Somaliland oo ah mudada uu codsaday.

Shuruudahaas ama qayb ka mid ah waa lagu wareejin karaa madaxda xafiiska socdaalka marka laga reebo koorsada waxbarashada iyadoo uu haysto kharash dabooli kara baahidiisa qofkaas ajnabiga ah inta uu joogo dhulka Somaliland. Ogolaanshaha u imaatin sabab waxbarasho wuxuu bixinayaa xaqa soo gelitaanka ama joogitaanka dhulka mudada waxbarashada ee lagama maarmaanka ah iyada oo ay weheliso shuruudihiii ogolaanshuhu.

## Qodobka 9aad

## Ogolaanshaha u imaatin Booqasho iyo shaqo

Marka laga reebo ajnebiga la cadeeyay inaan la doonayn sida uu qabo Qodobka 30aad, waa la siin karaa ajnebiga oggolaanshaha u imaatin booqasho ama oggolaansho u imaatin shaqo. Muddada iyo shuruudaha lagu bixiyo ku imaatin booqasho ama shaqo waxaa xadidaaya wasiirka Arrimaha Gudaha.

## Qodobka 10aad

## Ogolaanshaha Joogitaanka Mudeysan (Temporary Residence)

Xaqa soo gelitaanka iyo joogitaanka uu bixinaayo ogolaanshuhu waxaa la siin karaa ajnebi kasta marka laga reebo Ajnebigaan la doonayn, haddii uu la yimaado shuruudahan soo socda: -

B. Marka uu noqdo mid waafaqsan qodobka (4) afraad ee Xeerkan.

T. Haddii uu damaanad la yimaado qofkaasi danaynaya amase qof kale isaga magaciisa, isaga oo usoo gudbinaya hawlwadeenka socdaalka ee awooda u leh qiyaasta kharashka iyadoo uu madaxa xafiiska socdaalkuna cadeeyo inay tahay mid ku filan (Tigidh) dib ugu noqosho ah dhulkiisa ama wuxuu awoodaa Madaxa xafiiska socdaalku inuu weydiiyo tigidh uu ku tago waddanka ugu dhow oo loo ogol yahay inuu galo iyo qadar lacag ah oo aan ka badnayn 25% .
Amase, Inuu keeno damaanad hal ama ka badan dad degen dhulka Somaliland kuwaasoo u cadeeya madaxa xafiiska socdaalka inay bixin karaan damaanad u dhiganta qadarkaasi kor ku qoran.

Wasiirka Arrimaha Guduhu kadib markuu dhagaystay madaxda Xafiiska Socdaalka wuxuu ka dhaafi karaa Ajnebiga soo dalbay ogolaansha joogitaanka mudeysan shardiga ku xusan qodobkan xubintiisa koowaad (1) Xarafkiisa (B), kadib markay u cadaato in Ajnebigaasi haysto dariiqooyin kale oo uu ku dabooli karo quudkiisa inta uu joogo Dalka mudada ogolaanshaha iyo inuu dabooli karo tigidhkiisa dib ugu noqoshada ama mid uu ugu gudbi karo dhul kale.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Ogolaanshaha joogitaanka aan rasmiga ahayn waa in lagu tilmaamaa mudada uu joogayo Ajnebigu waddanka. Ajnebiga haysta ogolaanshaha joogitaanka mudeysan kama qaban karo hawl lagu helaayo faa'iido waddanka gudihiisa, haddii aanu haysan ogolaansho sida uu qabo Qodobka 24aad ee Xeerkan. Muddada oggolaanshaha joogitaanka mudeysan kama badnaan karo (3) saddex sanadood.

## Qodobka 11aad

## Ogolaanshaha joogitaanka Rasmiga ah (Permanent Residency)

Ogolaanshaha joogitaanka rasmiga ah waa la siin karaa qofka Ajnebiga ah marka uu soo codsado kadib haddii uu si sharci ah u joogo dhulka Somaliland, muddo aan ka yarayn shan (5) sanno. Isla xubintan waxaa lagu dhaqayaa labada isqabta iyo caruurta ka yar 18 (sided iyo toban) jir ee la nool Ajnebiga la siiyey ogolaanshaha joogitaanka rasmiga ah. Ogolaanshuhu wuu dhacayaa marka daneeyuhu ka maqnaado dalka Somaliland muddo ka badan (3) saddex sano oo xidhiidh ah.

## Qodobka 12aad

## Ku qoritaanka xaaska ogolaanshaha imaatinka iyo joogitaanka

Ajnebigu waa dalbi karaa in loogu qoro ogolaanshaha imaatinka joogitaanka xaaskiisa iyo caruurtiisa ka yar 18 jir ee isaga lanool ee uu masuulka ka yahay.

## Qodobka 13aad

## Wax ka bedelka iyo noqoshada Joogitaanka

Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxu awood u leeyahay mar kasta in uu wax ka bedalo ama la noqdo Xafiis ahaan ama iyadoo uu soo jeediyey Madaxa Xafiiska socdaalka oggolaansha imaatinka iyo joogitaanka la siiyey Ajnebiga si waafaqsan Xeerkan, iyadoo laga soo saarayo go'aan ku saabsan.

## Qodobka 14aad

## Awooda Wasiirka Arrimaha Gudaha ee ka joojinta imaatinka dhulka SomaliLand

Wasiirka Arrimaha Guduhu waa ka joojin karaa imaatinka dhulka Somaliland Ajnebi kasta.

## Qodobka 15aad

## Waajibka Ajnabiga ka saaran in ay sheegaan ciwaankooda

Waa waajib saaran qofka ajnebiga ah ee lasiiyey joogitaanka dhulka Somaliland sabab kasta awgeed in ay ku war geliyaan qoraal ahaan madaxda Xafiiska socdaalka cinwaankooda dhulka Somaliland iyo mar kasta oo ay timaado in uu wax iska bedelo ciwaankaasi.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 16aad

### Aaga dhulka Somaliland ee ka reeban Ajnebiga

Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu awood u leeyahay hadday isla gartaan Wasiirka Gaashaan- dhigga, inuu soo saaro qodobo ka reebaya Ajnebiga in uu galo soohdimo sugan oo dalka Somaliland ah iydoo sababtu tahay arrimo la xidhiidha xagga Nabad-gelyada Qaranka, iyadoo marka hore war-gelin guud la sameeyay.

# QAYBTA SADEXAAD

## QODOB GAAR AH OO LA XIDHIIDHA SABEEYAYAASHA, DADKA SAARAN DAYUURADAHA IYO BABUURTA

## Qodobka 17aad

### LIISANKA DADKA SAARAN SABEEYAYAASHA, DAYUURADAHA IYO BAABUURTA SOO GELAYSA AMA KA BAXAYSA DHULKA SOMALILAND

Taliyaha ama kan masuulka ka ah sabeeye, dayuurad ama baabuur aan ahayn kuwa ciidamada ee soo gelaya Dhulka Somaliland waa in uu keenaa hawlwadeenada socdaalka markii ay waydiiyaan Liis saxeexan oo ka kooban laba nuqul oo ay ku dhigan yihiin dhamaan rakaabka shaqaalaha iyo qof kastoo kale, isla markaana in uu bixiyo wixii war ah ee kale oo la waydiiyo. Wakiilada socdaalada Badda, Cirka ama Dhulka waxaa waajib ku ah inay madaxa Xafiiska socdaalka u keenaan liis saxan oo ka kooban laba nuqul oo saxeexan kuna qoran yihiin dadka safarka ah ee saaran sabeeyaha, Dayuuradda ama gaadhiga ee ka degey ama fuulay. Taliyaha Mas'uulka ka ah sabeeyaha, Dayuuradda ama Baabuurka Ciidamada shisheeye ee soo galay dalka waxaa waajib ku ah inuu madaxa xafiiska socdaalka u dhiibo liis saxeexan oo laba nuqul ah oo ay ku qoran yihiin dadka saaran Gaadiidkaas, kuwa doonaya in ay ku degaan Dalka, kuwa doonaya in ay sii joogaan dalka iyo kuwa doonaya inay baxaan.

## Qodobka 18aad

### Dejin ku meel gaadh ah

Hawlwadeenka xafiiska socdaalku waxay awood u leeyihiin bixinta ogolaanshaha imaatinka dadka safarka ah ama shaqaalaha sabeeyaha, Dayuuradda ama baabuurka inay si ku meel gaadh ah dalka ku soo galaan.

## Qodobka 19aad

### Degitaan Deg Deg ah

Qofka Shisheeyaha ah ee saaran sabeeye ama Dayuurad ku hakata ama sii maraysa dalka kuma degi karo dalka hadaan sidaas u ogolaan hawlwadeenada socdaalku, haddii aanay dhicin xaalad deg deg ah ama culus oo degitaanka qasab ka dhigaaya sida arrin caafimaad shil ama sabab kale marka loo eego nidaamka safaraddu oggol yihiin.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA AFRAAD

## DAMAANAD IYO RAHAN

### QODOBKA 20AAD

### DHIGITAANKA RAHAN IYO DAMAANAD

Rahanka uu tilmaamayo qodobka tobnaad waxa soo dhigi kara qofka Ajnebiga ah ama loo shaqeeyaha marka uu doonayo in uu shaqo mushahar leh ka qabto dalka Somaliland. Loo shaqeeyuhu wuxuu u wareejin karaa rahankaas qaab kale oo ah Damaanad una qorto Wasiirka Arrimaha Gudaha, kaas oo uu ku xaqiijinayo in uu Ajnebigaasi u shaqeeya ku celiyo dalkiisa isaga oo loo shaqeeyuhu bixinayo kharashkaas.

### QODOBKA 21AAD

### CUSBOONAYSIINTA DAMAANAD

Marka ogolaanshaha joogitaanka mar hore la siiyay Ajnebiga loo cusbonaysiinayo waxaa la doonayaa in la cusboonaysiiyo damaanada uu hore u bixiyay iyo mudadii uu xadiday madaxa xafiiska socdaalku.

### QODOBKA 22AAD

### SOO CELINTA RAHANKA MARKA QOFKA AJNEBIGA AH LA SIIYO JOOGITAANKA DHULKA SOMALILAND,

Sida uu tilmaamayo qodobka Tobnaad (10) kadibna loo ogolaado joogitaan joogto ah, rahankii uu dhiibay isagu ama qof kale uu isaga magaciisa ku dhiibay waa loo celinayaa. Talaabada u danbeysa ee bixitaanka Ajnebiga waxay keenaysaa soo celinta rahankii uu dhiibay isagu ama wakiilkiisa sharciga ahi, marka lasiiyo ama la helo gaadiid uu kaga baxo dalka.

### QODOBKA 23AAD

### LA IMAATINKA KHARASHKA SOCDAALKA SI LOO CESHADO RAHANKA

Hadii qof Ajnebi ah oo haystay ogolaansho joogitaan ku xidhan shuruud damaanadeed uu si Kama danbays ah dhulka Somaliland uga baxayo, markaasna la yimaado kharashkuu ku bixi lahaa ee ku celinta dalkiisa, waxaa dib loo siinayaa wixii hore looga hayay ee damaanad ah.

## QAYBTA SHANAAD OGOLAANSHAHA QABASHADA HAWL UJEEDADEEDU TAHAY FAA'IIDO DOON

### QODOBKA 24AAD

### OGOLAANSHO SHAQO

Qofka Ajnebiga ahi kama qaban karo Dhulka Somaliland hawl ujeedadeedu tahay faa'iido doon, hadii aanu ka haysan ogolaansho shaqo bixin Wasiirka Arrimaha Gudaha. Wasiirka Arimaha Guduhu marka uu bixiyo ogolaansho shaqo oo uu siiyo qof Ajnebi ah, waa in uu tixgeliyo haddii uu heli karo qof muwaadin ah oo u qalma hawshaas qofka ajnebiga ah loo doonayo sidaa waxaa xaqiijinaya Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqada iyo wasaarada ay hoos imanayso hawsha uu qofka ajnebiga ahi qabanayo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

## QODOBKA 25AAD

## JOOGSASHADA SHAQADA QOFKA AJNEBIGA AHI QABANAYO.

Marka uu qof ajnebi ahi uu joojiyo shaqada uu ka hayay dalka sabab kasta ha noqotee, loo shaqeeyaha waxaa laga doonayaa in (7) cisho gudahood laga bilaabo markii shaqadii joogsatay uu ku soo ogaysiiyo Wasaarada Arrimaha Gudaha.

## QODOBKA 26AAD

## ISBEDELKA SHAQADA EE QOFKA AJNEBIGA AH

Markii qof Ajnebi ah oo shaqo dalka ka hayay la siiyo shaqo kale, waxaa waajib ah in la raaco qodobka labaatanaad iyo afar iyo labaatanaad ee xeerkan.

## QODOBKA 27AAD

## JOOGSASHADA SHAQADA QOFKA AJNEBIGA AH

Sababo la xidhiidha isaga Qofka Ajnebiga ah ee joojiya shaqadii uu dalka ka hayay si dhamaystiran taasoo hore loogu oglaaday, waxa waajib ku ah in uu (7) cisho gudahood laga bilaabo maalintii ay shaqadu joogsatay ku ogaysiiyo Wasaarda Arrimaha Gudaha.

## QODOBKA 28AAD

## QOFKA AJNEBIGA AH EE DALKA SHAQO KU HAYSTA UU ISKII U LEEYAHAY

Qofka Ajnebiga ah ee dalka shaqo ku haysta oo uu iskii u leeyahay ee u bedesha shaqo ka duwan tii hore loogu ogolaaday, waa in uu qoraal ahaan ku ogaysiiyaa Wasaarada Arrimaha Gudaha Muddo (7) cisho gudahood laga bilaabo maalintii ay shaqadu istaagtay.

## QODOBKA 29AAD

## KA DHAAFID (EXCEPTION)

Qodobada madaxan lagu dhiqimaayo oo waa laga dhaafayaa Ajnebiga sida tooska ah ugu shaqeeya Dawlada, Hay'adaha Dawladda ama Ajnebiga u shaqeeya Ururada Caalamiga ah ama Ururada kale ee Maslaxadda u haya dawladda sida ay tilmaamayaan heshiisyada iyo xidhiidhyada caalamiga ah, sidoo kale waxaa la mid ah Ajnebiga loo ogolaaday joogitaanka joogtada ah.

## QAYBTA LIXAAD

## AJNEBIGA AAN LA DOONAYN

## QODOBKA 30AAD

## QEEXITAANKA AJNEBIGA AAN LA DOONAYN

Si waafaqsan xeerkan, waxaa lagu cadeyn karaa qof aan dalka laga doonayn:- Ajnebiga lagu helo xaaladaha soo socda:-

B. Haddii lagu soo saaro dal ka erin si sharciga waafaqsan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

T. Haddii aanu haysan wax ku filan oo uu quuto.

J. Haddii caddeyn dhakhtareed lagu muujiyo cudur la kala qaado ama cudur xagga jidhka ah oo dhinaca Caafimaadka awgeed la ogolaan Karin soo gelitaankiisa iyo ku negaanshihiisa dhulka Somaliland marka loo eego Nidaamka la xidhiidha Caafimaadka ee ka jira dalka.

X. Haddii uu si sharci daro ah uu ku soo galo dalka Somaliland isagoo aan Dukument sharci ah oo socdaal haysan iyo ogolaanshaha uu sharcigu sheegayo.

Kh. Haddii qofka joogitaankiisa ama hawsha uu ka hayaa dhulka Somaliland ay ka soo horjeedo danta nidaamka guud Nabadgelyada Qaranka, damiirka umadda iyo diinta. Caddeynta qofka Ajnebiga ah ee lagu soo saarayo in aan dalka laga dooneyn waxay ku soo baxaysaa go'aan Wasiirka Arrimaha gudaha.

## QODOBKA 31AAD
## SOO DHEX GALKA HAWLWADEENADA SOCDAALKA AJNEBIGA AAN LA DOONEYN

Hawlwadeen kasta ee socdaal ama xubin kasta oo Ciidanka Boliiska ah waxay awood u leedahay:-

B. Inay is hortaagaan Ajnebiga aan la dooneyn haddii loo baahdana isticmaalaan xoog si aanu usoo gelin dhulka Somaliland.

T. Inay ka horjoogsadaan Ajnebiga aan la dooneyn in aanu uga soo degin dhulka Somaliland sabeeye, Diyaarad ama Baabuur.

J. Inay Xidhaan amar la'aan ama warqada qabashada la'aanteed iyagooo wargelinaaya maxkamada awooda u leh si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta, Ajnebi kasta oo aan la dooneyn oo laga helo dhulka Somaliland isagoo ku xad gudbay qodobada xeerkan.

## Qodobka 32aad
## Celinta Ajnebiga aan la dooneyn

Markii Ajnebiga aan la dooneyn soo galo dhulka Somaliland, hawlwadeenka socdaalku wuxuu awood u leeyahay in uu ku amro Taliyaha ama qofka masuulka ka ah sabeeyaha, Dayuurada ama Baabuurka uu la socdo Ajnebiga aan la dooneyn amase cidda wakiilka uga ah Somaliland inay u dhoofiyaan dood la'aan meel ka baxsan dhulka Somaliland iyadoo la saarayo isla sabeeyahaas, dayuurada ama Baabuurka marka ugu horreysa ee u haboon, kharashkana waxa qaba Qofka ama Gaadiidka. Marka Taliyaha, mulkiilaha ama Wakiilka sabeeyaha, dayaarad ama Baabuur uu u ogolaado ku soo gelitaanka dhulka Somaliland Ajnebi aan la dooneyn, sabeeyahaas, dayuuraddaas ama Baabuurkaas, waxay wadajir ahaan ku qasban yihiin bixinta kharashka uga baxay Dawlada.

## QAYBTA TODOBAAD

## QODOBKA 33AAD

## KA SAARITAANKA DALKA

Ajnebiga laga saarayo dalku waa: -

1. Marka garsoore awood u lihi amro ka saaritaankiisa muddo sharci ah.

2. Marka Wasiirka Arrimaha Guduhu uu go'aankiisa ku amro saaritaanka si waafaqsan qodobka 34aad ee Xeerkan.

## QODOBKA 34AAD

## HABKA FULINTA AJNEBIGA AAN LA DOONEYN

Go'aanka Wasiirka Arrimaha Gudaha ee lagu caddeeyay in Ajnebigaas yahay mid aan la doonayn waa in lagu wargeliyaa qoraal. Go'aankaas waa in lagu daraa amar ah ka bixitaanka dalka muddo sugan iyo habka sugan ee loo baahan yahay. Ajnebiga aan u hogaansamin amarkaas waxaa waajib ah in laga eryo dalka.

## QODOBKA 35AAD

## KA NOQOSHADA GO'AANKA SAARIDDA

Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu Awood u leeyahay in uu iskii ama iyadoo uu soo jeediyey madaxa Xafiiska Socdaalku ka noqdo go'aankii ka saaritaanka ee ku soo baxay Ajnebi si waafaqsan Qodobka 34aad ee Xeerkan.

## QODOBKA 36AAD

## KHARASHKA FULINTA GO'AANKA KA SAARITAANKA DALKA

Kharashka kaga baxa Dawlada Somaliland, fulinta go'aanka ka saaridda Ajnebiga waxa laga dhigayaa dayn ay gashay Dawladdu waxayna ku soo ceshanaysaa iyadoo go'aankaas fulitaanka hor dhigta Ajnebiga ama wakiilkiisa.

## QAYBTA SIDEEDAAD

## QODOBO CIQAABEED

## QODOBKA 37AAD

Sida Xeerkani qabo qof kasta oo ku xad-gudba qodobada soo socda ama Fulin waaya waxaa loo aqoonsanayaa eedaysane, waxaanu mutaystay ciqaabta ku xusan xeerkan:-

b. Laga helo Dhulka Somaliland ama meel ka baxsan, bixiya caddeyn been abuur ah ama la yimaada Dukument been abuur ah si uu u helo ama uga caawiyo qof kale si uu u helo ogolaansho sida uu qabo Xeerkani.

t. Bedela Ogolaansho ama Dukument kasta oo la siiyo ama qoraal si waafaqsan Xeerka ama bedelka Koobigii.

j. Siiya, ka iibiya ama u dhiibta qof kale ogolaansho ama Dukument kasta oo loo siiyey si waafaqsan Xeerka ama isticmaala ogolaansho ama Ducument kasta oo la siiyay qof kale oo magacaaban.

x. Si ula kac ah u siiya kaalmo ama u ogolaada qofkasta oo soo gelaaya dhulka Somaliland ama ka baxaaya isagoo ku xad gudbaaya qodobada Xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Kh. Aan ka jawaabin ama diida in uu ka jawaabo su'aal kasta oo sharci ah ama caqli gal ah ee uu u jeediyo hawlwadeenada socdaal amase si ula kac ah u bixiya jawaab aan ku qasbanayn si waafaqsan sharciga in uu ku jawaabo su'aal u keenaysa dambi.

d. Si ula kac ah u diida in uu iska soo xaadiriyo hawlwadeen socdaal iyadoo laga dalbay.
r. Si ula kac ah u isticmaala ama u haysta ogolaansho been abuur ah ama aan ansax ahayn ama Dukument kale oo la mid ah oo la been abuuray amase qoraalo amase isticmaala amase haysta ogolaansho la bedelay ama loo bixiyay si aan sharci ahayn.
s. Hor joogsaday hawlwadeen socdaal si uu u guto waajibkiisa.

Sh. Qariya ama isku daya in uu qariyo su'aalo uu u soo jeediyay hawlwadeenka socdaalku isagoo gudanaaya xilkiisa.
Dh. Aan bixin liiska ama muddooyin kale oo la waydiiyay si waafaqsan qodobka 2aad ee Xeerkan.

c. U soo gala sharci daro ama looga helo Dhulka Somaliland si sharci daro ah isagoo ku xadgudbay xeerkan.
g. Isagoo ah Ajnebi aan la dooneyn aanu dhawrin hawlwadeenka socdaalku sharciga ku wajahan ama Boliiska ee ku sii daaya dalka.
f. Aan dhawrin shuruudaha lagu qeexay ogolaansho kasta ee uu bixiyo Xeerkani ama qodobada nidaamiya fulinta
k. Isagoo ah Ajnebi qabta hawl laga helaayo dheef isagoo aan dhawrin ogolaanshaha uu tilmaamayo Xeerkani.
l. Qofka siiya qof Ajnebi ah shaqo isagoo aan haysan ogolaanshaha uu xeerkani tilmaamay.
m. Isku daya inuu galo dambi kasta oo keenay marka loo eego xeerkan ciqaab.
n. Sameeya fal dambiyeed isagoo u gargaaraya in la falo mid kamid ah danbiyada kor ku xusan.
w. Qofka siiya qof kale qoraal uu og yahay in uu kaga baxsanaayo danbi uu galay oo ka mid ah dunuubtaas kor lagu sheegayo.
h. Ku xadgudubka qodob kasta ee xeerkan.
y. Qofkasta oo gala danbiyada uu tilaamamayo xeerkani waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan laba iyo toban bilood (12) ama ganaax dhan Sh.SL 10,000 (Toban kun) ama labadaba oo la isku daro ciqaabta haddii falku aanu keenin danbi aad u culus. Marka qofka ku magacaaban ogolaanshuhu galo mid ka mid ah danbiyada ku xusan xubinta hore ee qodobkan, Garsoorka ka sokow Ciqaaabta uu saarayo wuxuu amri karaa kala noqosho ogolaanshaha uu haysto.

## Qodobka 38aad

## Ciqaabta saaran Ajnebiga la saaray ee soo galay Dhulka Somaliland

Ajnebiga laga saaray dhulka Somaliland si waafaqsan Xeerkan ee dib u soo gala dalka iyadoo go'aankii ka saaritaanku ansax yahay, waxaa lagu ciqaabayaa haddii aan falku dhisayn danbi aad u culus xadhig ilaa (3) saddex sanno ama ganaax dhan ilaa 30,000 Sh.SL (Sodon kun) ama labadaba, dibna waa loo eryayaa. Qodobka 39aad Ciqaabta saaran Mulkiilaha, Wakiilka ama Qofka Masuulka ka ah Sabeeyaha, Dayuuradda ama Baabuurka Marka Ajnebiga aan la dooneyn soo galo dhulka Somaliland isagoo ku yimaad sabeeye, Dayuurad ama Baabuur iyadoo qofka mulkiilaha ama Wakiilka ama qofka masuulka ka ah sabeeyaha, Dayuurada ama Baabuurka aannu war ka hayn, markaas oo kale mulkiilaha, wakiilka ama qofka masuulka ka ah waxaa lagu ciqaabayaa mid kasta gaar ahaantiisa hadii aanu falku keenayn danbi aad u culus ganaax dhan Somaliland Shiling 3000/-. Qodobkan lagu dhaqi maayo marka aan Ajnebigaasi aan la dooneyn haysto ogolaansho ansax ah oo lagu bixiyay si waafaqsan Xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH

## Qodobka 40aad Awooda Garsoore in uu joojiiyo sabeeye, Dayuurad ama Baabuur

Marka Ajnebiga aan la doonayn soo galo dhulka Somaliland isagoo ku soo galay sabeeye, dayuurad ama baabuur, garsooruhu wuxuu amri karaa in sabeeyaha dayuurada ama baabuurku xayiraado ilaa mulkiilaha, wakiilka ama qofka masuulka ka ah sabeeyaha, dayuurada ama baabuurku uu fuliyo go'aanada hawlwadeenka socdaalku arko lagama maarmaan ee dhoofinta Ajnebigaas la dooneyn. Marka mulkiilaha, wakiilka ama qofka masuulka ka ah sabeeye, dayuurad ama baabuur la saaro ciqaab lacageed si waafaqsan xeerkan, garsooruhu wuxuu amri karaa in sabeeyaha, dayuuradda ama baabuurku xayirnaado ilaa mulkiilaha, wakiilka ama qofka masuulka ka ahi ka bixinaayo ciqaabtaas lacageed ee la saaray, garsooruhu wuxuu amri karaa in lagu fuliyo sabeeyaha, dayuuradda ama baabuurkaba.

## Qodobka 41aad

## Ajuuradda Ogolaanshaha.

Bixinta iyo Cusboonaysiinta oggolaanshaha ee qodobada 6, 7, 10, iyo 11 ee xeerkan waxaa ku xidhan bixinta ajuuro uu xeer nidaamiye ku soo saaro Wasiirka Maaliyaddu. Bixinta iyo Cusboonaysiinta ogolaanshaha ee Qodobada 6, 7, 10, iyo 11 ee Xeerkan waxaa ku xidhan bixinta ajuuradan soo socota oo laga qaadayo qofka la siiyo:-

b. Ogolaanshaha Joogitaanka Rasmiga ah
t. Ogolaanshaha Joogitaanka Mudeysan
j. Ogolaanshaha u imaatinka Dalxiis
x. Ogolaanshaha Jid mar waqti kabadan 48 Saac

Kh. Ogolaanshaha Booqasho Ganacsi

d. Ogolaanshaha booqasho shaqo Ajuuradda ogolaanshaha Dawlada ee xubinta hore waxa loo qaadayaa hab ah tigidh iyada oo ay raad tirayaan tigidhkaas "Cancel" madaxda awooda u lihi. Waa laga dhaafayaa ajuuradda Ajnebiga sida tooska ah ugu shaqeeya Dawlada Somaliland ama hay'adaha dawladda, ajnebiga u shaqeeya Ururada Caalamiga ah ama hawl dawladda maslaxad u ah u haya oo ku saleysan heshiisyo ama isla ogolaansho caalami ah oo keenay isweydaarsi xidhiidh markaasoo dawladaas shisheeye iyaduna ka dhaafaysa ajuurada muwaadiniinta Somaliland.

## Qodobka 42aad

## Ka dhaafida mudnaanta iyo dhawrsanaanta xaga sharciga iyo heshiisyada caalamiga ah.

Qodobada xeerkani waxba ka bedeli maayaan ka dhaafiddii mudnaantii iyo dhawrsanaantii ka timid dhinaca qaynuunka dawliga ah (international Law) ee sida guud loo ogolyahay iyo heshiisyadii ama isla ogolaanshaha caalamiga ah ee la doonayo inay Jamhuuriyada Somaliland dhawrto.

## Qodobka 43aad

## Xurmo Qaxoonti Siyaasi

Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu awood u leeyahay in uu amro in meelo gaar ah laga dhigo xarumo si ku meel gaadh ah loo dejiyo dadka Ajnebiga ah iyo dhul-laawaha ee soo gala dhulka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

Somaliland, kuwaasoo ka soo qaxay arrimo siyaasadeed lana yimaada Dukument iyo ogolaanshaha uu tilmaamayo qodobka 4aad ee Xeerkani.

### Qodobka 44aad

### Qodobada kala Guurka

Ogolaanshaha joogitaanka rasmi ah iyo ogolaanshaha kale ee lagu bixiyey xeer kasta oo uu tirtirayo xeerkani waxay ahaanayaan ansax, haddii lagu bixiyey si waafaqsan Xeerkan.

Ajabaniga marka uu xeerkani dhaqangalay daganaa dhulka Somaliland muddo (5) shan sano ah waa la siinayaa ogolaanshaha rasmiga ah si waafaqsan xeerkan.

### Qodobka 45aad

### Xeer Nidaamiye

Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu soo saari karaa Xeer-Nidaamiye si loo fuliyo Xeerkan.

### Qodobka 46aad

### Tirtirid

Waxaa la tirtiray sharciga lambarkiisu yahay No. 9 ee 27 June 1966 iyo dhamaan xeerarka ka soo horjeeda Xeerkan ama aan la socon Karin.

### Qodobka 47aad

### Dhaqan Galka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. Lagana baahiyo qalabka warfaafinta.

ALLAA MAHAD LEH

(AXMED CABDI MAXAMUUD) XAABSADE

GUDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADA S/LAND

(CABDI/MAN CISMAN CABDULLE)

XOGHAYAHA GOLAHA WAKIILADDA



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE